



Barnaamijka Dhawaan-soo-galka

Sharaxa Barnaamijka: Barnaamijka dhawaan-soo-galku waa barnaamij muddo gaaban lagu dhigo Ingiriisida iyo dhaqan-gelinta dugsiyada Ameerika, iyo weliba maadooyinka kale ee aqoonta. Barnaamijka dhawaan-soo-galku waxa loogu talagalay ardayda dhawaan u soo guuray Ameerika, ee ay ku yar tahay aqoonta Ingiriisida iyo waxbarashaduba dalkoodii. Ardaydu waxay tagaan fasalo ka gaara ardayda Ingiriisudu tahay afkooda hooyo muddo xaddidan.

Himilada Baritaanka: Si loo gaadho heerar horumar xagga kordhinta derajada iyo noqoshada qof ku hadla labada luqadood oo wax ku bartay.

Wuxu Ka Kooban Yahay Barnaamijku: Ilmahaagu wuxu helay barashada qaybaha calaamadysan:

- Akhriska iyo qoritaanka Ingiriisida
- Baritaanka gaarka oo Ingiriisiya (ESL)
- Xisaabta oo Ingiriisi ah

Habka Bixitaanka (Macluumaadka qaybtani waa kala duwan yihiin min degmo ilaa degmo.)

- Go,aanka looga gudbinayo arday barnaamijka dhawaan imaadeyaasha waxaa lagu garaa mid-mid ayadoo la eegayo qoraallada muujiya hormarka waxbarahada, galka gooba shaqada ardayga, u-fiirsasho lagu eegayo hormarka dhanka bulshada iyo aqoonta, iyo qoraalka muujiya hormarka waxbarashada. Qiimeynta an adeegsanno si aan u go`aaminno heerka gudbidu waxay ka kooban tahay heerar xirfado iyo aqoon loo eegayo xeerarka iyo nidaamka Iskuulka, la qabsashada dhaqameedka Maraykanka, dabecadda wax akhriska(waxbarashada) iyo xirfadaha.
 - Qeemaynta loo yaqaan “ WIDA MODEL” oo la keeno darajada 2.5 ama ka badan
 - Akhris/qoralka loo yaqaan “Fountas and Pinnel” oo la keeno darajo labo fasal ka hooseysa fasalka uu ardaygu hadda ku jiro
 - Xisaabta oola keeno darajo qiimaynteedu hordhac tahay oo labo fasal ka hooseysa fasalka uu ardaygu hadda ku jiro
- Markii ardaygu buuxiyo shuruudihii gudbidda, wuxuu u gudbayaa xisadaha fasal isaga/ayada ku haboon, ayadoo macallimiinta “ESLku” ka sii caawinayaan luqadda
- Ardaygu wuxuu ku jiri karaa Barnaamijka Dhawaan Imaadayaasha 35 usbuuc oo laga bilaabo markii uu yimid Banaadir Akaadami
- Hadii ardaygu awoodi waayo in uu buuxiyo shuruudaha ka gudubka muddo 35 usbuuc ah, waa laga saaraya barnaamijka

Adeegyada Waxbarashada Gaarka Ardayda naafada ah ee u baahan adeegyada gaarka, barashada afku wuxuu buuxinayaa ujeedooyinka Barnaamijka Waxbarasho ee Qof-ahaaneed (IEP).